WARQADA UBADNA DIB LOOMA REEBAYO (NO CHILD LEFT BEHIND) (NCLB) FACT SHEET: WAXYAABAHA WAALIDKA KUWA BARTO LUQADA INGIRISIGA U BAAHAN YAHIIN IN AY OGAADAAN

(No Child Left Behind Fact Sheet – Somali)

Qeybta III ee Sharciga Ubadna Dib Looma Reebayo (No Child Left Behind Act) wuxuu dalbanaya in dugsiga ubadkaada ku ogeysiiyo waxyaabaha ku saabsan tacliinta ubadkaada isaga ama iyada oo ah Bartaha Luqada Ingirisiga (English Language Learner) (ELL). Dugsiga waa in u si la fahmi karo ku soo ogeysiiyo, iyadoo sida suurtogalka ah, la isticmaalayo luqadaada hooyo.

Waa in 30 maalin ka yar lagu soo ogeysiiyo kaddib marka u bilaawdo sannad dugsiyeedka arrinta ku saabsan aqoonsiga ubadkaada lagu meeleynaayo barnaamijka tacliinta barashada luqada. Ama, haddii ubadkaada ku qoran yahay bartanka saannad dugsiyeedka, waa in labo todobaad ka yar lagugu soo ogeysiiyo kaddib marka ubadkaada lagu meeleyo barnaamijka noocas ah. Waa in lagu soo ogeysiiyo waxyaabaha soo socdo.

- Sababaha loo tilmaamay ubadkaada iyo ogolaashada barnaamijka ubadkaada lagu meeleyay.
- Heerka aqoonta Ingirisiga ubadkaada ee dhageysiga, ku hadalka, aqriska, iyo qoraalka.
- Hababka barashada ay shaqaalaha dugsiga la isticmaalan ubadkaada.
- Sida barnaamijka u buuxinaayo baahida barashada iyo tacliinta ubadkaada.
- Sida barnaamijka u kaalmeyn doono ubadkaada in u barto Ingirisiga iyo u buuxin doono inta laga filaayo xagga heerka fasalka iyo da'da.
- Sharuudaha ka-bixtaanka barnaamijka ee ardayga qaaska ah.
- Haddii ubadkaada leeyahay itaal-darri, sida barnaamijka u buuxinaayo baahida tacliinta ubadkaada.
- Saamiga la filaayo mudaada dhexe inta u dhexeyso barnaamijka iyo inta laga gaarayo barnaamijyada barashada caadiga ah.
- Saamiga qalin-jabinta laga filaayo dugsiga sare ee ubadkaada ku qoran yahay.
- Xaqa aad u leedahay in aad ubadkaada ka saartid barnaamijka.
- Helitaanka gargaarga ee u dugsiga adiga kaa siiyo fasiraada iyo kala doorashada barnaamijyada kala duwan iyo hababka tababarka ee u bixiyo dugsiga.
- Sida adiga oo ah waalidka aad si firfircoon oga qeybgali kartid tacliinta ubadkaada, oo ka mid ah a) in u barto Ingirisiga, b) in u maadooyinka barashada muhimka ka gaaro heerarka sare, iyo c) in u qaabilo nuxurka barashada Gobolka ee si isku mid ah u adag iyo heerarka barashada laga filaayo dhammaan ardayda.
- Haddii ubadkaada ku fashalo in u gaaro horumar xagga ujeedooyinka la cabiri karo sannadkii ee sannad kasta, ka yar 30 maalin kaddib marka u dhaco fashalka.